

Sharciga 14 Jannaayo 1958 lamba. 5

Dhismaha Hayadda Waddaniga ee Uruurinta Cagafta (H.W.U.C.)

MAAMULUHU

Markuu arkay ansixinta Golaha Xeerdejinta

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Waxaa Sharci loo rogay Amar-Sharci 9 Noofember 1957, lamba. 10. Ayada oo lagu sameeyey wax-ka-beddelka soo socda:

Qod. 2

Qod. 9aad, bilowga faqradda ugu dambeysa waxaa sidan soo socota loogu kordhiyey:

- Guddigu waxa uu ku kulmayaa fadhi caadi ah ugu yaraan laba jeer sanadkii, ka sokow kulamadaan caadiga ahayn oo loo arko munaab.

Qod. 3

Qod. 11aad, bilowga faqraddiisa ugu dambeysa waxaa sidan soo socota loogu kordhiyey:

- Guddoomiyuhu waxa uu, kaddib marka uu dhegeysto Golaha Maamulka, xubnaha isla golahaas ka dhe dooran karaa hal la-taliye wakiila o uu ku aamino hal ama ka badan awoodaha la siiyey.

Qod. 4

Qod. 12aad bilowga faqradda saddexaad waxaa wax looga beddelay sidan:

- La-taliyeyaasha oo, cudur-daar láaan, aan soo qaybgelin (soo dhex dhexgelin) 5 fadhi oo isku xiga ee Golaha, waxaa la caddeynaya (lagu dhawaaqayaa) in ay dheceen, waana beddelayaa, kaddib marka uu soo-jeediyo Guddoomiyaha Hayadda (E.N.A.M). Haddii ay jiraan wax Guddoomiyaha ka reebaya gudashada xilkiisa, ku-xigeenka Guddoomiyaha ayaa xilkiisa qabanaya, haddii uu maqan yahayna, wasiirka Arrimaha Maaliyadda, kaddib marka uu dhegeysto Golaha Wasiirrada, waxa uu sameynayaa wixii magacaabis ah, ee loo baahan yahay(lagama maarmaan ah).

Qod. 5

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa laga bilaabo maalinta lagu nashriyo Faafinta Rasmiga.

Sharcigan waxaa la gelinayaa Ururinta Rasmiga ah, ee Sharciyada, waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga. Qof kasta, oo ku gudboon, waxa khasab ku ah in uu dhowro kuna khasbo in loo dhowro sida sharci Soomaaliya leedahay.

Taariikhda Muqdisho, 14^{ka} Jannaayo 1958.

Ku-Simaha Maamulaha

Piero Franca

Wasiirka Kowaad

Iyo ku-simahaha Wasiirka Arrimaha Maaliyadda

Cabdullahi Ciise Maxamuud